



**COVID-19  
VACCINE**  
Public Health  
Advice

# Tallaalka COVID-19

Macluumaad muhiim ah oo ku  
saabsan Tallaalka Covid 19 ee  
Moderna.

**Daabacaada 2 aad**  
**10-kii Febraayo 2021**



**Rialtas na hÉireann**  
Government of Ireland

## Ku saabsan Buug-yarahan.

Buug-yarahan wuxuu kuu sheegayaa tallaalka COVID-19 (coronavirus). Wuxuu kuu sheegaysaa:

- waa maxay COVID-19
- waa maxay tallaalka COVID-19
- yaa la siin doonaa marka hore, sababta iyo meesha laga helayo
- sababta ay muhiim u tahay in la qaato tallaalka
- yaa u baahan inuu helo iyo yaa dib loogu dhigayaa qaadashada talaalka.
- badbaadada tallaalka iyo waxyeeladiisa
- meesha aad ka heli karto macluumaad dheeri ah

**Fadlan si taxaddar leh u akhri buugyarahan. Waxaad sidoo kale kala hadli kartaa xirfadle daryeel caafimaad, sida GP (dhakhtar)-gaaga ama Farmashiistaha, arinta ku saabsan talaalka.**

## Waa maxay Covid19?

**COVID-19 waa cudur saamayn ku yeelan kara sambabadaada iyo marinnada hawada, iyo mararka qaarkood qaybaha kale ee jirkaaga. Waxaa sababa fayras la yiraahdo coronavirus.**

COVID-19 waa cudur aad u faafa. Waxay ku faaftaa hawada, gaar ahaan dhibcaha la soo saaro markay dadku qufacayaan ama hindhisayaan, ama markay taabtaan meelaha ay dhibcahaasi ku soo dageen ka dibna ay taabtaan indhahooda, sankooda ama afkooda. COVID-19 wuxuu sababi karaa cudur daran, isbitaal dhigis iyo xitaa dhimasho.

## **Calaamadaha Guud ee COVID-19 waxa ka mid ah:**

- Qandho (heerkul sare oo ah 38 digrii ama ka sareeya)
- Qufac cusub - tani waxay noqon kartaa nooc kasta oo qufac ah, ma aha oo kaliya qufaca qalalan
- Neefta oo ku qabata ama neefsashada oo ku adkaata
- Lumin ama u isbeddel ku dhaca dareenkaaga urta ama dhadhanka - tani macnaheedu waa inaad ogaatay inaad urin karin ama dhadhamin karin waxna, ama ay si kale kuu urayaan ama kuu dhadhamayaan.

Waxaa laga yaabaa inaad lahayn astaamaha oo dhan ama waxaad dareemi kartaa inaad guud ahaan dareemayn caafimaad qab sidaadii hore oo kale. Waxay qaadan kartaa ilaa 14 maalmood in astaamaha lagu arko. Waxay la mid noqon karaan astaamaha hargabka ama durayga.

Haddii aad leedahay wax calaamado ah oo kuwa caadiga ah ee COVID-19, is-go'doomi (qolkaaga joog) oo wac (dhakhtarka) cudurada guud. Waxay kuu diyaarin karaan baaritaanka la xidhiidha COVID-19.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan COVID-19, fadlan booqo **[www.HSE.ie/coronavirus](http://www.HSE.ie/coronavirus)** ama wac taleefanka HSELive on **1850 24 1850**.

## **Yaa halista ugu wayn ugu jiraa cudurka COVID-19?**

Dadka da'doodu tahay 65 sano iyo kuwa ka weyn iyo dadka qaba xaaladaha caafimaad qaarkood waxay khatar wayn ugu jiraan inay si halis ah u xanuunsadaan haddii ay qaadaan COVID-19.

Dadka waayeelka ah ee ku nool goobaha daryeelka muddada-dheer sidoo kale waxay halis weyn ugu jiraan inay si daran u bukoodaan haddii ay qaadaan COVID-19, maadaama fayraskani si dhakhso leh ugu faafo dadka wada nool.

Shaqaalaha daryeelka caafimaadku waxay leeyihiin khatar sare oo ah inuu ku dhaco xanuunka COVID-19 marka loo eego daka kale.

## **Waa maxay talaalka Covid-19 ?**

Tallaalku waa walax hagaajineysa difaac ka hortagga cudur gaar ah. Tallaalka COVID-19 ayaa kaa difaaci doona COVID-19. Haddii dadka la tallaalo, waa

inay sidoo kale yareeysaa tirada dadka bulshadeena ee sida xun u bukooda ama xitaa ugu dhinta xanuunka COVID-19. Talaalku wuxuu baraa habka difaaca jirka sida uu kaaga difaaco lahaa cudurada. Aad ayey uga badbaado badan tahay habkaaga difaaca jirka inuu barto sida looga difaaco jirka iyadoo la qaadanayo talaalka COVID-19..

## Yaa aynu siinaynaa tallaalka marka koowaad?

Anaga (Maamulka Adeegga Caafimaadka) waxaan siineynaa tallaalka dadka halista ugu badan ugu jira COVID-19 marka hore. Tallaalo ayaa la siin doonaa marka ay soo gaadho Ireland.

Waxaad ka arki kartaa liiska kooxaha loogu talagalay:

- Dadka jira 65 sano iyo ka weyn ee ku nool xarumaha daryeelka muddada-dheer
- Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee safka hore

Waxaad ka arki kartaa websaydka liis dhamaystiran oo ah kooxaha mudnaanta leh

**[www.gov.ie/covid19vaccine](http://www.gov.ie/covid19vaccine)**

**In kastoo adiga ku khusayso in inaad go'aansato inaad qaadato tallaalka, HSE waxay si xoog leh kugula talineysaa inaad qaadato tallaalka sida ugu dhakhsaha badan marka aan kuu soo bandhigno.**

**HSE waxay bixinaysaa talaal lacag la'aan.**

Waxaad u baahan doontaa inaad aqriso buugyarahan iyo Buug-yaraha Macluumaadka Bukaanka kahor intaadan qaadan tallaalka. Waxaad ka heli kartaa Buug-yaraha Macluumaadka Bukaanka websaydka

**[www.hse.ie/covid19vaccinePIL](http://www.hse.ie/covid19vaccinePIL)**. Waxa kale oo aad horay ula sii hadli kartaa xirfadle daryeel caafimaad. Haddii aad go'aansato inaad qaadato tallaalka, waxaad bixin doontaa oggolaanshahaaga oo la duubi doono.

## Yaa I tallaalaya aniga?

Tallaalkaaga waa qofka ku siinaya tallaalkaaga. Iyagu waa xirfadle caafimaad oo tababaran oo la shaqeeya HSE, sida Kalkaaliye Caafimaad, Dhakhtar ama Farmashiiste.

## Maxay muhiim u tahay in la qaato tallaalka COVID-19?

Qaadashada tallaalka COVID-19 waxa uu kaa ilaaliyaa dhibaatooyinka halista ah ee COVID-19. Ujeedadayada aan u bixinayn tallaalka dadweynaha waa inaan ilaalino dadka oo aan yareynno jirrada iyo dhimashada uu keeno fayraskani.

**Waxaan hore iigu dhacay cudurka COVID-19, Markaa miyaan u baahanahay in aan qaato tallaalka ?**

Haa. Xitaa haddii aad horey uu kuugu dhacay COVID-19, weli waa uu kugu dhici karaa markale. Tallaalku wuxuu yareynayaa halista aad ugu jirto qaadista COVID-19 markale. Xitaa haddii aad mar labaad qaado COVID-19, tallaalku wuxuu yareyn karaa halista ah astaamahaaga.

## Imika waxaan qabaa cudurka COVID-19, Ma qaadan karaa Tallaalka?

Maya. Waa inaad dib u dhigtaa tallaalka illaa aad ka bogsato COVID-19.

### **Sidan samee:**

- Ugu yaraan afar toddobaad ka dib marka ugu horreysa ee aad calaamadaha isku aragto ama
- Afar toddobaad tan iyo markii aad iska hubisay COVID-19

## Qaadashada Tallaalka.

Xageen ka helaa tallaalka?

Waxaa lagaa siin doonaa tallaalka rugta tallaalka, GP-gaaga ama farmashiyaha bulshada.

Haddii aad ku nooshahay xarun daryeel muddo-dheer ah, waxaa lagugu siin doonaa tallaalka xaruntaas oo dhan. Haddii aad tahay shaqaale daryeel caafimaad oo safka hore ah, waxaa lagu siin doonaa tallaalka meesha aad ka shaqayso ama rugta tallaalka.

Markay tahay goortaada, waxaan kuu sheegi doonaa sida loo helo tallaalkaaga adoo u maraya xayeyiin ama martiqaad toos ah. Waa muhiim inaad la xiriirin HSE si aad tallaalka uga hesho ka hor.

## Tallaal nooc ah ayaa diyaar ah?

Tallaalka aan ku siineyno waxaa loo yaqaan tallaalka COVID-19 ee Moderna.

Tallaalka waxaa soo saaray shirkadda Moderna. Tallaalka mRNA wuxuu jidhkaaga barayaa sida loo sameeyo borotiin kicin kara jawaab celinta difaaca jirka,

iyadoon la isticmaalin fayraska nool ee sababa COVID-19.

Jirkaaga ayaa markaa samenaya unugyada difaaca jirka ee ka caawiya

la dagaallanka infekshinka haddii fayraska dhabta ah uu soo galo jirkaaga mustaqbalka.

## Sidee la iiga tallaalayaa cudurka COVID-19 ?

Tallaalka COVID-19 waxaa lagaa siinayaa cirbad ahaan gacantaada qaybta sare. Waxay qaadan doontaa oo kaliya dhowr daqiiqo..

## Imisa qiyaasood oo tallaalka COVID-19 ayaan u baahanahay inaan qaato?

Waxaad u baahan doontaa laba qiyaasood oo ah tallaalka COVID-19 si aad u hesho difaaca ugu fiican. Waxaad u baahan tahay inaad hesho qiyaasta labaad ee tallaalka 28 maalmood gudahood (afar toddobaad oo buuxa) ka dib qaadashada qiyaasta koowaad ee tallaalka.

## Tallaalku ma yahay mid la hubo?

HSE waxay isticmaashaa oo keliya tallaalada markay la kulmaan heerarka looga baahan yahay ee badbaadada iyo waxtarka.

In kasta oo shaqada soo saarista tallaallada COVID-19 ay u dhaqaaqday si ka dhakhso badan sidii caadiga ahayd, tallaalka aan ku siineyno wuxuu soo maray dhammaan tallaabooyinkii caadiga ahaa ee loo baahnaa si loo horumariyo loona ansixiyo tallaal badbaado leh oo waxtar leh.

Si loo oggolaado isticmaalka, tallaalka COVID-19 wuxuu soo maray dhammaan tijaabooyinka ee ku dawaynta bukaanka iyo waxa kale oo uu maray dhamaan hubinta fayodhowrka daawooyinka kale ee shatiga leh iyadoo la raacayo heerarka caalamiga ah ee badbaadada.

Tallaalka aan ku siineyno waxaa loo yaqaan tallaalka Moderna ee cudurka COVID-19. Waxa uu leeyahay:

Waxaa lagu tijaabiyay kumanaan qof oo qayb ka ah tijaabooyinka caafimaad

Waxuu soo maray heerar adag oo xagga fayodhowrka ah, tayada iyo waxtarka ah, waxaana oggolaaday oo shati siiyay sharciyeeyeyaal. Marka Ireland laga hadlayo, kuwa sharciga bixiyaa waa Wakaaladda Daawooyinka Yurub (EMA) - booqo [www.ema.europa.eu](http://www.ema.europa.eu) wixii macluumaad dheeraad ah.



## Waa maxay waxyeelada ama saamaynta tallaalku?

Sida dawooyinka kale oo dhan, tallaalku wuxuu keeni karaa waxyeelo. Intooda badani waa kuwo yar ama dhexdhexaad ah, muddo-gaaban, oo qof kastaana ma saamaynayso.

In ka badan 10kiiba hal ayaa laga yaabaa inay la kulmaan saamaynta. Waxa ka mid ah

- In qofku dareemo daal
- Jilicsanaan, barar, casaan ama cuncun gacanta oo ah meeshii ay ku mudeen tallaalka
- Madax xanuun
- Unugyada qanjidhada ka hooseeya gacanta oo barara, oo ah meeshii laga muday
- Murqo xanuun
- Kalagoosyada oo qofka xanuuna
- Lallabbo ama matagid
- Qandho (heerkulka 38 darajo Celsius ama ka sareeya)

Saamaynta 'Bell's palsy' waa saameyn naadir ah oo lagu arko in ka badan 1 qof 10,000 qofba. Waa dhif iyo naadir, dadka buuxiyay wajiga ayaa laga yaabaa inay yeeshaan barar ku dhaca wejigooda. Tan waxaa lagu arkaa in ka badan 1 qof 10,000 qof.

Waxyeellooyinka halista ah, sida fal-celinta xasaasiyadda daran, aad ayey u yar yihiin, oo lagu arko qiyaastii 1 milyankii qofba.

Tallaalka COVID-19 wuxuu soo maray tijaabooyin caafimaad oo isku mid ah iyo hubinta amaanka dhamaan talaalada kale ee shatiga la siiyay, sikastaba ha noqotee tallaalku waa mid cusub, macluumaadka waxyeeladiisa ee xiliga muddada dheer waa xaddidan tahay.

Maaddaama dad badan oo ku nool Ireland iyo adduunka oo dhan ay qaataan tallaalkan, macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhibaatooyinka soo raaca tallaalkan ayaa laga yaabaa in la helo. HSE waxay macluumaadkan si joogto ah ugu cusbooneysiin doontaa websaydkeena, haddii loo baahdana, waxay cusbooneysiin doontaa waraaqaha macluumaadka ee dadka lasiinayo marka ugu horreysa ama labaad ee tallaalka la qaadanayo.

## Xumadda Tallaalka Ka dib

Waa wax iska caadi ah in la dareemo qandho tallaalka ka dib. Badanaa, tani waxay ku dhacdaa laba maalmood ama (48 saacadood) gudahood marka tallaalka la qaato ka dib, waxayna ku baaba'aysaa laba maalmood gudahood. Waxay u badan tahay inaad qandho yeelato kadib qiyaastaada labaad ee tallaalka.

Haddii aad dareento raaxo la'aan, qaado paracetamol ama ibuprofen sida laguugu sheegay santuuqa ama warqada-yare ee hagista. Haddii aad ka walwalsan tahay xaalkaaga, fadlan raadi talo caafimaad.



## Tallaalka cudurka COVID-19 ma sababi karaa isla cudurka COVID-19?

Maya. Tallaalka COVID-19 Kama qaadaysid cudurka COVID-19. Waa suurtagal inaad qabato COVID-19 kahor intaadan qaadan tallaalkaaga oo aadan ogaanin inaad leedahay astaamaha illaa laga gaaro ballanta tallaalkaaga.

Haddii aad leedahay wax calaamado ah oo caadi ah oo ah COVID-19, waxaa muhiim ah in aad gooni usu go'doomiso (qolkaaga joogto) oo aad diyaarsato baaritaan bilaash ah si aad u ogaato haddii aad qabto cudurka COVID-19.

Haddii aad leedahay qandho bilaabmantay wax ka badan laba maalmood tallaalka koowaad kadib, ama qandhadaas cisho wax ka badan ku haysa, waa inaad is-gooni-yeeshaa (karantiil) oo aad weydiisataa Dhakhtarkaaga inuu kuu diyaariyo baaritaanka COVID-19 ah.

Haddii aad calaamado leedahay qiyaasta ugu horreysa ka dib, weli waxaad u baahan tahay inaad qaadato qiyaasta labaad ee tallaalka. In kasta oo aad ka heli karto xoogaa difaac ah qiyaasta ugu horreysa, qaadashada qiyaasta labaad ayaa ku siin doonta kahortagga ugu fiican ee fayraska.

## Ma jiraan dad aan qaadan karin tallaalka COVID-19?

**Haa. Ma qaadan kartid talaalka COVID-19 haddii:**

✓ Haddii aad xasaasiyad daran ku yeelatay mid ka mid ah maaddooyinka ku jira tallaalka (oo ay ku jiraan polyetylen glycol). Akhriso Buug-yaraha Macluumaadka Bukaanka si aad u aragto liiska waxyaabaha ay ka kooban yihiin.

✓ Haad xasaasiyad daran ku yeelatay qiyaastii tallaalka koowaad.

Haddii aad fal-celin xasaasiyadeed oo dhaqso ah ugu yeelatay tallaalka kale, daawada laysku duro ama polysorbate 80, waa inaad la hadashaa Dhakhtarkaaga ka hor intaadan qaadan tallaalka COVID-19.

Dadka badankood waxay awood u yeelan doonaan inay si badbaado leh u qaataan tallaalka. Qofka ku siinaya tallaalka wuxuu ku faraxsanyahay inuu ka jawaabo wixii su'aalo ah ee aad ku qabto ballantaada tallaalka.

Waxay sidoo kale ku siin doonaan buugyaraha talobixinta daryeelka kadib, iyo kaarka diiwaanka tallaalka oo muujinaya magaca iyo lambarka tallaalka ee lagu siiyay.

## **Ma qaadan karaa tallaalka COVID-19 haddii heerkulkaagu aad u kacsanyahay?**

Maya. Waa inaad dib u dhigtaa qaadashada tallaalka haddii aad qandho leedahay (heerkulkaagu yahay 38 darajo Celsius ah ama ka sareeya), illaa aad ka bogsato.

## **Ammaan ma tahay in la qaato tallaalka haddii aad uur leedahay ama aad naas nuujinayso?**

Ma jiraan wax caddeyna ah in tallaalka COVID-19 uusan ahayn mid aamin ah haddii aad uur leedahay.

Tallaalka si baaxad leh looguma tijaabin dumarka uurka leh sidaa darteed caddeynta la heli karo waqtigan waa mid xadidan.

Haddii aad tahay shaqaale daryeel caafimaad ama aad ka tirsan tahay koox khatar ugu jirta, oo aad uur leedahay, waa inaad kala hadashaa takhtarkaaga dhalmada ama GP-ga sidii aad u heli lahayd tallaalka COVID-19.

Waad qaadan kartaa tallaalka COVID-19 haddii aad naas nuujiso.

## **Intee inleeg ayay ku qaadanaysaa tallaalka waxtarkiisu inuu shaqeeyo?**

Kadib marka qofku qaato labada qiyaasood ee tallaalka COVID-19, dadka badankood waxay yeelan doonaan difaac. Tan macnaheedu waxa weeye in jidhkoodu iska difaaci doono COVID-19.

Waxay qaadataa 14 maalmood ka dib qaadashada talaalka labaad si ay u shaqeyso. Waxaa jirta fursad yar oo aad weli ku qaadi karto COVID-19, xitaa haddii aad tallaalantahay.

## **Tallaalku wax ma u tarayaa qofkasta?**

Tallaalka waxaa lagu tijaabiyay dadka jira 18 sano iyo wixii ka weyn. Caddaynta hadda la hayo ayaa ah in tallaalku uu difaacayo 94% dadka qaata.

Haddii difaacaaga jidhku daciif yahay, ma jirto khatar dheeraad ah oo aad qaadan karto tallaalka laakiin waxaa suuragal ah in uusan si fiican kuugu shaqeynaynin.

## **Sideen uga warbixiyaa saamaynta tallaalka?**

Sida tallaalada kale oo dhan, waxaad u soo wargelin kartaa Hay'adda kormeerka Alaabooyinka Caafimaadka (HPRA)

HPRA waa hay'adda sharciyeynta ee Jamhuuriyadda Ireland ee dawooyinka, aaladaha caafimaadka iyo alaabada kale ee caafimaadka. Iyada oo qayb ka ah

kaalinteeda kormeerka amniga ee daawooyinka, HPRA waxay ku shaqeysaa nidaam loo marayo sidii xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ama xubnaha bulshada uga warbixin lahaayeen wixii fal-celin ahee laga shakiyo (waxyellooyin) ee la xiriira daawooyinka iyo tallaallada ka dhacay Ireland.

HPRA waxay si xoogan u dhiiri galineysaa soo tabinta waxyaabaha looga shakisan yahay falcelinada xun (dhibaatooyinka soo raaca) ee la xiriira tallaallada COVID-19 si loo taageero kormeerka joogtada ah ee adeegooda badbaadada iyo in si waxtar leh loo isticmaalo. Si aad uga warbixiso fal-celin xun oo looga shakiyay tallaalka COVID-19, fadlan booqo **[www.hpra.ie/report](http://www.hpra.ie/report)**.

Waxa kale oo aad weydiisan kartaa dhakhtarkaaga ama xubin qoyskaaga ah inay arintan kaala warbixiyaan.

haddii macluumaad badan oo ku saabsan tallaalka la ogyahay waa in la bixiyaa, oo meeshii suurtagal ah la gaadhsiiyaa, waana in lagu daro nambarka tirada tallaalka.

HPRA ma bixin karto talo caafimaad oo ku saabsan kiisaska shaqsigah. Xubnaha bulshada waa inay la xiriiraan xirfadlhooda daryeelka caafimaad (dhaqtarkooda ama farmashiistaha) wixii walaac caafimaad ah oo ay qabaan.

## **Intee in le'eg ayuu difaaca jirku sii jirayaa marka tallaalkan la qaato?**

Ma ogin weli intee in le'eg ayuu difaaca jirku sii jiri doonaa. Tijaabooyin caafimaad ayaa socda si loo ogaado arintan.

## **Markii aan qaato tallaalka, taasi miyay ka dhigan tahay inaan ku fidin doonin dadka kale cudurka COVID-19?**

Weli garan mayno haddii qofku qaato tallaalka inuu ka joojinayo inuu ku faafiso fayraska 'COVID-19' dadka kale. Taasi waa sababta ay muhiim u tahay inaan dhammaanteen sii wadno raacidda talo-bixinta caafimaadka bulshada ee ku saabsan sida loo joojiyo faafitaanka fayraska.

Gaar ahaan, waxaad weli waxaad u baahan tahay inaad:

- Raacdo tilmaamaha kala fogaanta bulshada (ka fogee laba mitir kuwa kale meesha ay suurogal tahay)
- Xidho maaskarada wajiga
- Si joogto ah u maydh gacmahaaga.

**HSE, Waaxda Caafimaadka iyo Ururka Caafimaadka Adduunka waxay ku talinayaan dadka inay qaataan tallaalka COVID-19 markii la siiyo. Waad ku mahadsantahay inaad ilaalisay naftaada iyo dadka kaleba.**

## **Macluumaad dheeraad ah.**

Wixii macluumaad dheeraad ah, akhri Buug-yaraha Macluumaadka Bukaanka. Buugyarahan waxa lagu daabacayaa maalinta aad qaadaneyso tallaabadaada, ama waxaad heli kartaa Buug-yaraha Macluumaadka Bukaanka websaydkan [www.hse.ie/covid19vaccinePIL](http://www.hse.ie/covid19vaccinePIL)

Waxa kale oo aad la hadli kartaa xirfadle caafimaad, sida Dhakhtarkaaga,

Farmashiistaha ama kooxda daryeelka caafimaadka.

Waxaad sidoo kale booqan karta websaydka HSE **[www.hse.ie/covid19vaccine](http://www.hse.ie/covid19vaccine)**  
Ama wac taleefanka tooska ah ee HSElive **1850 24 1850**.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan tallaalka COVID-19, oo ay ku jiraan qalabka oo qaabab kale ah iyo turjumidda taageerada booqashada ka eeg. **[HSE.ie/covid19vaccinematerials](http://HSE.ie/covid19vaccinematerials)**



## Xogtaada Shakhsiga ah.


Si hab badbaado leh loogu maamulo tallaalka loona qoro dhammaan macluumaadka lagama maarmaanka u ah la socoshada iyo maamulidda tallaalka, HSE waxay ka baaraandegi doontaa macluumaadkaaga shakhsiyeed. Dhammaan macluumaadka ay ku shaqaynayso HSE waxay noqon doonaan kuwo waafaqsan shuruucda guud, gaar ahaan Xeerka Ilaalinta Xogta Guud (GDPR) oo la dhaqan galiyay 2018.

Ka shaqeynta xogtaada waxay noqon doontaa mid xalaal ah oo cadaalad ah. Waxaa kaliya ee loogu shaqeyn doonaa ww ujeedada gaarka ah si loo maamulayo talaalista. Mabda'a Yaraynta Xogta ayaa la adeegsaday. Tan macnaheedu waa xogta kaliya ee lagama maarmaanka u ah in lagu aqoonsado, ballantaadana la diwaangaliyo, diiwaangelinta tallaalkaaga iyo la socoshada saameyntiisana waa la duubayaa.

Waxaad leedahay xuquuqahan soo socda marka laga hadlayo xogta iyada oo la raacayo GDPR marka loo eego xogtaada shaqsiyeed ee la isticmaalayo.

- Codsiga xogtaada iyo helitaanka macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed (oo badanaa loo yaqaan 'codsi ku saabsan helitaanka mawduuca xogta qofka'). Tani waxay awood kuu siineysaa inaad hesho nuqul ka mid ah macluumaadka shakhsiga ah ee aan kaa hayno adiga iyo inaad hubiso inaan si sharciga waafaqsan loo isticmaalay.
- Waxaan codsaneynaa sixitaan ku saabsan xogta shakhsiga ah ee aan kaa hayno. Tani waxay awood kuu siineysaa inaad heshid wixii macluumaad ah ee aan dhammeystirnayn ama aan sax ahayn ee aan kaa hayno ee lagaa saxay.
- Codso tirtirida macluumaadkaaga shaqsiyeed. Tani waxay awood kuu siineysaa inaad na weydiiso inaan tirtirno ama ka saarno xogtaada shakhsiga ah meesha aysan jirin sabab wanaagsan oo aan ugu sii hayno ku shaqaynta xogtaada. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad na weydiiso inaan tirtirno ama ka saarno macluumaadkaaga shaqsiyeed meesha aad ku isticmaashay xuquuqdaada inaad diido ka shaqeynta xogtaada.
- Waad diidi kartaa in lagu shaqeeyo macluumaadkaaga shaqsiyeed.

**Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa websaydkan**  
**[www.HSE.ie/eng/gdpr](http://www.HSE.ie/eng/gdpr)**



**COVID-19  
VACCINE**  
Public Health  
Advice

**Waxa daabacay HSE  
10-kii Febraayo 2021**

**1-E**



**Rialtas na hEireann**  
Government of Ireland